



Dheefahan waxa loogu talagalay in lagu isticmaalo 122 maalmood, oo ay ku jiraan maalinta lagu helay koontada. **122 maalmood ka dib, qadar kasta oo dheef ah oo aan la isticmaalin way dhacaysaa waxaana laga saarayaan koontada.** Tan macnaheedy waa in maalinta 123, aad koontada ku arki doonto haraaga \$0. Dheefaha **lama** beddeli karo haddii ay lumaan, la xaday ama dhaceen. **Dheefaha la saaray lagama qaadan karo racfaan.** Fadlan booqo [www.ebtedge.com](http://www.ebtedge.com) ama ka wac adeeg macaamiisha ebtEDGE halkan 888-997-2227 wixii ku saabsan taariikhda helitaanka gaarka ah ee dheefaha ilmahaaga.

### **Helitaanka kaarka**

Haddii aanad helin kaarka ilmahaaga ee SUN Bucks, fadlan soo gudbi Foomka Caawinta. Haddii kaarku lumo ama la xaday, waxaad codsan kartaa in kaar cusub laguuu soo diro adigoo la xiriiraya Edge. Kaarku wuxuu ku imaan doonaa baqshad cad oo lagu xusay ilmaha. Hubi in magaca ilmahaagu ku qoran yahay sanduuqaaga boostada. Xafiiska boostada ayaa laga yaabaa inaanay kuu keenin haddii ilmahaagu aanu ahayn degane ku qoran cinwaanka.

### **Sida loo isticmaalo dheefaha SUN Bucks ee ilmahaaga**

Ka dib markaad hesho kaarkaaga SUN Bucks, fadlan booqo [www.ebtedge.com](http://www.ebtedge.com) si aad u hubiso koontadaada dheefaha adigoo adeegsanaya abka moobeelka ama ka wac adeega macaamiisha ebtEDGE halkan 888-997-2227 si aad u sameysato lambarkaaga sirta ah (PIN). Waxaad sidoo kale soo dejisan kartaa barnaamijka EBT Edge. Hubi inaad islamarkiiba isticmaasho lacagta soo hartay. Waxaa lagaa filayaa inaad dib u isticmaasho kaarkan sanad kasta oo ilmahaagu u qalmo, markaa **fadlan ku xafid meel ammaan ah** ka dib marka dhammaan dheefaha la isticmaalo ama ay dhacaan. Dheefaha SUN Bucks waxaa lagu isticmaali karaa dukaamada raashinka, suuqyada beeralayda iyo dukaamada kale ee la oggol yahay.

### **Ilaha**

Bogga websaydhka SUN Bucks: [dcyf.mn.gov/sun-bucks](http://dcyf.mn.gov/sun-bucks)

Bogga su'aalaha inta badan la is weydiyo ee SUN Bucks: [dcyf.mn.gov/sun-bucks-faq](http://dcyf.mn.gov/sun-bucks-faq)

Foomka Caawinta ee SUN Bucks: [sebthelp.state.mn.us](http://sebthelp.state.mn.us)

State of Minnesota Client Rights and Responsibilities: [edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-4163-ENG](http://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-4163-ENG)